Somali edition

WELLINGTON REGION
EMERGENCY MANAGEMENT

U diyaargarowga Dhulgariirka Marka uu dhaco

Qaado warqadaan oo ka faa'ideyso macluumaadka ku yaal, ka dib isdiyaari

HADEER - TAAN

1. La soco xaaladda degdegga ah

Waxaa jira siyaabo badan oo aad ku heli karto macluumaad inta lagu jiro xaalad degdeg ah, oo ay ku jiraan inaad dhageysato raadiyaha, la socoto warbaahinta, daawato telefishanka, hubiso marinnada WREMO iyo kuwa golaha deegaanka, iyo sidoo kale Ogeysiisyada Degdegga ah ee Moobilka e..

Ogeysiisyada Degdegga ah ee Moobilka waxaa la soo saari doonaa oo keliya marka ay jirto khatar nolosha ah ama carqalad weyn oo saameyn karta qayb ama dhammaan gobolka Wellington.

Ogow calaamadaha digniinta dabiiciga ah

Haddii aad ku jirto aag khatar tsunami ah oo aad dareento dhulgariir dheer ama xooggan, isla markiiba u guur meel ka sarreysa heerka badda ama gudaha u sii soco sida ugu macquulsan marka gariirku istaago.

Meelaha ugu wanaagsan ee laga heli karo macluumaadka ama warbixinta aad u baahan tahay inta lagu jiro xaalad degdeg ah waxaa ka mid ah:

- WREMO's emergency website
  VISIT www.WREMO.nz
- WREMO's Facebook page
  LIKE facebook.com/WREMOnz
- Fiiri bogga internetka ee golaha deegaankaaga iyo warbaahinta bulshada
- **Dhageyso raadiyaha New Zealand iyo saldhigyada degaanka**

Shaqo wanaagsan! Waxaad sameysay talaabada ugu horeysa ee aad ku badbaado.

Gobolka Wellington waa meel aad u fiican oo lagu noolaado, laakiin waa duur yar.

Waxa inta badan dhaca waxaan u leenahay waayo-aragnimo marka uu dhaco dhulgariir, duufaan, daadad iyo buuraha ama dhulalka oo jajaba, waxaa sidoo kale halis ugu jirnaa Sunami.

Xaaladaha deg dega ah waxay leeyihiin saameyn la mid ah. Way adagtahay in la gaaro meelaha uu waxyeelada soo gaaray, bulshada iyo qoysaska oo hela waxyaabaha aasaasiga u ah.

Waxaanu ku qeexnay waxyaabaha aad sameyn kartid si aad ugu diyaarisid qoyskaaga iyo bulshadaba si aad u hesho mashaariicda adag ka dib dhulgariir ballaaran oo amaan ah, iyo sida ugu wanaagsan ee suurtagalka ah.

Marka aad saxiixdid digniinta waxaad dhamaysay tallaabada koowaad!

U dhaqaaq waxa aad sameyn kartid maanta, caawa, iyo labadii todobaad ee xigta ee soo socda si qoyskaaga loo diyaariyo. Talaabo kasta waxay si cad u qalantaa dadaalka haddii aad su'aalo qabto fadlan nagala soo xiriir.

KA SOCOTO KOOXDA WREMO

macnaheedu waa Xafiiska Xaalada deg dega ee gobolka Wellington



Intaad ku jirtid websaayidka getprepared.org.nz

1. Raadi xiriiriyaha sare ee (Hub) waa xarunta adeega deg dega badbaadinta bulshada ee golaha deegaanka si aad u ogaato Qorshaha Waxqabadka Bulshada ee degaankaaga.
2. Fiiri maabka ama Qariidadda Tsunami (Sunami) si aad u aragto meelaha aad ku nooshahay, shaqada iyo ciyaarta waxay ku jirtaa aaga daad-gureynta Sunami.
3. Ka fiiri bogga websaayidka www.wremo.nz. Tani waa meesha aad ka heli doonto macluumaad macquul ah marka ay jirto xaalad deg deg ah.

2. Isku day inaad tababar sameyso sida, dhulka fariiso, isdabool iyo gacanta jirkaada ku qabso oo meeshaada haka kicin inta uu dhulgariirka ka istaagayo

Qubarada caalamiga ah waxay ogyihiin inaad yareyn karto fursad kasto oo kuu geysan kara dhaawac hadii aad sameyso ka hortag sida, dhulka fariiso, isdabool iyo gacanta jirkaada ku qabso oo meeshaada haka kicin inta uu dhulgariirka ka istaagayo.

Dhibaatooyinka ugu badan oo dhaca inta lagu jiro dhulgariirku waxa keena alaabta gurhaya, qurxinta iyo kuwa dhismaha, sida foornada saqafka ah, halkii ay burburin lahaayeen dhismaha.

Hadii aadan awoodin inaad dhulka fariisato, oo aadan is dabooli karin oo gacanta ku hayn karin jirkaaga, ku dadaal inaad sameyso sida ugu fiican ee aad ugu badbaadin laheyd madaxaaga iyo qoortaada.

Inta uu socdo dhulgariirka:

Gudaha – Sii joog gudaha oo haka soo bixin ilaa dhulgariirka ka istaago, markaad guriga dibada uga baxeysid si taxadar oo amaan leh uga soo bax adiga oo iska ilaalinaaya ama dhici kara in ay wax kor kaaga soo dhici karaan.

Dhismaha dhaadheer – Sida kor ku xusan, ha ku degdegin in dibada aad u baxdo sababtoo ah dabka digniinta ayaa qeyliyay ama yeeray.

Dibada:**–** ka dheeroow sida dhismayaasha dhaadheer, geedaha, iyo biraha dhaadheer oo korontada ku xiran, ka dibna dhulka fariiso, isdabool iyo gacanta jirkaada ku qabso inta uu dhulgariirka ka istaagayo.

Markey wadada mashquul tahay – Ha joogsanin jidadka waxaa laga yaabaa inay kugu soo dhacaan jajabka guryaha agagaarkiisa aad ku dhowdahay.

3. Ogoow meesha ay Sunami kaa xigto

Haddii aad ku dhowdahay xeebta inta uu dhulgariirku socdo iyo dhulka oo waqti dheer xoog u ruxda fadlan sida ugu dhaqsiyaha badan uga carar ama orod.

Qolada dhulgariirka ku shaqada leh digniinta Sunami keliya ay kuusoo dirayaan waa dhulgariirka laftiisa.

Sunami waa hirar badan oo socon kara saacado badan. Hirka koowaad waxaa laga yaabaa inuusan noqon kan ugu weyn. Laakiin waxaa loo baahan yahay inaad sida ugu dhaqsiyaha badan uga cararto goobaha aan Sunamiga soo gaareeyn ama aad tagto goobaha loogu tala galay marka ay Sunaamiga dhacaan.

Kala hadal deriskaada sidee dadka oo dhan ugu badbaadi karaan – qaarbaa laga yaabaa inay u baahdaan caawinaad dheeraad ah.

Ogoow hadii meelaha aad ku nooshahay sida, shaqada, ama meelaha lagu ciyaaro ay ku jiraan aaga Sunaami iyo meesha aad u baahan tahay inaad aado adigoo nawad qaba.

getprepared.nz/TsunamiZone

Waa inaad sugtaa oo heshaa ogolaansho, ka hor inta aadan u dhawaanin xeebta ama biyaha Sunaamiga ka dhacay.



10 MIN

Hirka ugu horeeya wuxuu imaan karaa ugu yaraan 10 daqiiqo, markaa ma jiro waqti digniin rasmi ah la bixiyo sida (sirens). Waxaan kaliya u dirnaa digniino loogu talagalay Sunami oo ka bilaabanaya meelaha fog, sida Koonfurta Ameerika.

4. Sameyso qorshe guri

Ka dib marka uu dhaco dhulgariir ballaaran, waxaa laga yaabaa inaadan awoodin in aad isticmaashid taleefoonkaada, emaikaada aadan diri karin ama aadan isticmaali karin warbaahinta bulshada. Hadaba qorsho sameyso markii ay dhacaan isgaarsiin la'aan wixii aad sameyn laheyd.

Caruurtaada ku xafid meel amaan ah.

Iskuulada waxay leeyihiin qorshayaal lagu ilaaliyo caruurtaada si amaan ah.

Ka fiiri qorshaha gurmadka deg-dega ah ee iskuulkaada: **getprepared.nz/schools**

U diyaari ugu yaraan seddex saaxiib ama qoys oo ku lug leh masaafada u dhexeysa iskuulka si aad u qaadato caruurtaada. Waxaad magacyadooda siisaa dugsigaada ama iskuulkaada.

Kala hadal caruurtaada waxa ay filan karaan iyo cidda qaadi karta hadii aadan halkaas tegi karin.

Ku heshiiya meel nabadgelyo leh oo aad ku kulantaan.

Waxaad go'aan ku gaartaan goobtii aad ku kulmi laheydeen oo aad isku heli laheydeen midba midka kale iyo waxa kale loo baahan yahay inaad diyaarsato gurigii aad joogi laheyd hadey noqoto mid ka mid ah saaxiibadaa ama familkaaga waa hadii aad u baahato.

Kala sooc ceymiska guriga iyo alaabta waa hadii aad ku jirtid Ceymis (Insurance).

Dadka intooda badan ceymis malahan. Isku day in gurigaada iyo hantidaadaba aad caymis galiso sidii aad u ogaato qiimaha lacagta. La xariir shirkada caymiskaada si aad uga wada hadashaan arinta ceymiska.

Waxaa loo baahan yahay in guriga iyo shaqada aad dhigato (Grab bag) waa boorso yar oo kujira wayaabaha aasaasiga ah ee aad isticmaasho marweliba

Waxaa dhici kara in aad ka baxdo guriga si deg deg ah ama socod dheer kugu qaadato guriga ilaa iyo shaqadaada. Waa inaad ka fekertaa sidii aad u diyaarsan laheyd waxyaabaha aad u baahan tahay oo aasaasiga kuu ah oo ku hayn kara muddo saacado gudahood ama maalmo gudahood. Adiga ayaa diyaarsan kara maloo baahna waxyaabo qaali kuugu imaanaya inaad diyaarsato aan ka aheyn waxyaabaha aasaasiga kuu ah.

getprepared.nz/GrabBag Waa boorso yar oo kujira waxyaabaha aasaasiga ah ee aad isticmaasho marweliba.

Adeegyada ama waxyaabaha muhiimka ah sida Korontada, Gaaska, Biyaha iyo wixii la mid ah

Qasaare gaarsiisan waxay noqon kartaa mid qatar ah waxayna kaa horjoogsaneysaa inaad joogtid gurigaada.

Raadi meesha gaaska laga xiro ama furo waa hadii aad gaas leedahay, raadi meesha uu ku yaalo saacada korontadaada, raadi tubada biyaha meesha laga furo ama xiro iyo waxaa kaloo ku dadaashaa inaad barato sida loo xiro ama furo waxyaabahaan kor ku suxan. Si cad ah u calaamadeey sidii hadhow aad dhaqsi u hesho marka ay xaalad deg deg ah ay dhacaan.

MAALMAHA NASASHADA ISBUUCAN

5. Ka dhig gurigaada meel amaan ah.

ilaali amaanka madaxa caaga biyaha lagu keydiyo

Hubi shoolada ama tubada qiiqa guriga ka saarta in si sax ah loo xaqiijiyo. Hadii aadan isticmaalin shoolada ka saar.

Ka baddel wixii qashin ah oo ku aruuray saqafka iyo hadii ay jiraan wixii saqafka celinayay haduu ka baxay ama lumay.

Gurigaada oo amaan ka dhigtid waxay yareyn doontaa dhaawaca ku imaan kara inta uu dhulgariirku socdo, xitaa hadii uu wax yar dhaawac soo gaaro waa sii joogi kartaa.

Iska hubi saqafka, derbiyada, alaabta guriga iyo aasaaska dhismaha guriga hadii la deganaan karo iyo hadii kale.

Haddii aad u baahato caawinaad, raadso qof dhismaha xirfad u leh si aad u hubiso gurigaada.

Waxaad raadsataa qolada ku shaqada leh marka uu dhaco dhulgariirku sidii ay u hubin lahaayeen in guriga la deganaan karo iyo inkale.
getprepared.nz/SafeHomes

Guriga aad degan tahay hadii uu yahay guri ijaar ama kiro.

Milkiilaha guriga ayaa dan ugu jirta hadii weli gurigaada uu fiican yahay ama weli lasii deganaan karo dhulgariirka ka dib, la hadal milkiilaha guriga sidii uga dhigi lahaa guri amaan eh oo lagu hoyan karo asagoo tixraacaya tusaalahan.

Waxaad diyaarisaa taageero dheeraad ah oo loogu tala galay xoojinta derbiyada aan laxoojin oo ubaahan in laxoojiyo.

Si fiican u adkee alaabaha culculus.

Si fiican u adkee booyada biyaha kululeysa iyo dabka qoryaha lagu shido oo qiiqa kor ka bixiyo.



6. Kaydi biyaha

Ka dib markii dhulgariirka weyn uu dhaco biyaha tubada masoconayaan oo wey go'ayaan, marka waxaad u baahan tahay inaad hesho biyo deg deg ah. Waa ay ka sii wanaagsan tahay inta aad biyo keydin karto inaad keydiso. Waxaa kaloo u baahan tahay inaad haysatid biyo kugu filan oo ku hayn kara muddo hal todobaad ama hal isbuuc.

Soo iibso haanta biyaha lagu keydiyo kuwa waa weyn oo qaadi kara ugu yaraan 200 Liiter iyo in ka badan hadii aad awoodo. Markey tahay maalmaha nasashada ama fasaxa (Weekend) soo iibso haanta biyaha lagu keydiyo, sidaa darteed waxaad heli ama keydsan doontaa biyo kugu filan inta lagu gudo jiro xaalad deg deg ah waxay yihiin kuwa la awoodi karo oo si fudud adiga isugu xir xiri karto. Ku buuxi haanta biyo nadiif ah ka dib si fiican u xir ama u adkee.

getprepared.nz/ Water

Hadii aadan heli karin haanta biyaha lagu keydiyo, wax yar biyo ah aad keydsato waxay dhaantaa biyo la'aan.

Isticmaal dhalooyinka ama caagaga waaweyn. Ha isticmaalin dhalooyinka hore ee caanaha sababtoo ah haraaga caanuhu waxay wax u dhimayaan biyaha.

Ku buuxi caag kasta biyaha tubada, ka dib si adag ugu dabool daboolka caaga biyaha ka dib ku keydi meel qabow oo mugdi ah. Nadiifi dhalada oo ku buuxi biyaha 12-kii biloodba mar.



7. La kulan deriskaaga

Dadka badankood waxaa soo badbaadiyay dadka halkaas jooga. Deriskaaga ayaa ah kuwa ugu horeeya ee ku taageeri kara.

Isku day inaad ka mid noqoto ama aad isku xirto dad yar oo koowan oo jooga wadada gudahiisa maalinta nasashada isbuuca (weekend) si marka ay dhacaan xaalad deg deg ah oo ay sahal kugu noqdaan isdhaxgalka dadka wadada jooga.

- Waa inaad xaqiijisaa in qofweliba uu nabad qabo isla markaasna la xanaaneeyo, gaar ahaan kuwa laga yaawo inay u baahan yihiin caawinaad dheeraad ah.
- La wadaag qeyraadka iyo xirfadahaaga si midba midka kale u caawiyo.
- Istaageera midba midka kale maalmaha lagu jiro iyo kan dambe.

getprepared.nz/Neighbours

Xitaa ka sii fiican waxaad noqon doontaa inaad ku caawiso dhisidda bulsho saaxiibtinimo leh oo dheeraad ah maalin kasta ee sanadka.

Ka bilow si fudud oo hordhac leh. Talaabada koowaad mar weliba waa ay adag tahay! Ka dibna waxaad soo jeedisaa sidii aad isku weydaarsan laheydeen cinwaanadiina ama meesha aad degan tihiin iyo taleefanadiina si aad u wada xiriirtaan marka ay dhacaan xaalad deg deg ah. Wadahadalka waa meesha ugu fudud ee laga bilaabo.

Waxaa kaloo aad bilaabi kartaa Kooxda Taageerida Deriska ee wadada jooga ama ku biiri kartaa kuwa deegaanka ka mid ah.

Waxaad soo qaban qaabisaa qabasho lagu sameynayo BBQ kaasoo ah cuntada dabka lagu dubo ama lagu shiilo. La shaqey shimbiraha kula deriska ah dhawr isbuuc.

8. Isku day inaad gurigaada ku sameysid kaambin (camping).

Gurigaada waxaa ka buuxa waxyaabaha loogu baahan yahay gurmadka deg dega sida waxyaabaha maalinlaha ah.

Bustayaasha sariirtaada saaran, dharka gurigaada, iyo waxyaabaha jikada ku jira waa wax walba oo aad u isticmaali karto marka ay dhacaan xaalad deg deg ah.

- Waa inaad u diyaarisaa wixii caruurta ay isticmaali lahaayeen, caruurta socod baradka ah iyo xayawaanka, waa hadii aad haysato.
- Hayso liiska daawooyinkaada oo hubi inaad haysato wax kugu filan.

Adiga oo daryeelaaya naftaada iyo reerkaagaba, waxaa sidoo kale caawineysaa adeegyada gurmadka deg-dega ah xooga saaraya qayraadka yar ee ku jira dadka una baahan gargaar aad u badan.

Ku kaydi armaajada ama qolka cuntada lagu kaydiyo sida cuntada qasacadeysan inta aad awoodo oo kugu filan oo aadan u baahaneynin mudo todobaad ah inaad dukaanka aado.

1 2 3 4 5 6 7 WAAN DIYAAR GAROWNAY! ✓ Waxaan haysanaa cunto nagu filan oo nahayn kara mudo todobaad gudaheed markii ay xaalad deg deg ah ay dhacaan.

Ka qayb qaado

Waa lacag la'aan Koorsooyinka Isku diyaarinta Xaaladaha Degdega.

Baro sida loo caawiyo qoyskaaga iyo bulshada aad la nooshahay inaad u diyaargarowdo, ka jawaabto kana soo kabato dhulgariirka weyn. Waxaad ka caawin doontaa bulshadaada inaad si fiican u wargeliso, si fiican isugu diyaariso aadna ku xirnaato bulshadaada

Isku qor mid ka mid ah koorsooyinka. **getprepared.nz/ Courses**

Waxaa kaloo ka mid naqan kartaa WREMO adigoo lacag la'aan ugu shaqeeynaaya si aad u caawiso bulshadaada iyo sidii ay u diyaargaroowi lahaayeen marka uu xaalad deg deg ah dhaco isla markaana ugu hortagi lahaayeen. **getprepared.nz/Volunteer** Kani waa websaayidka ka mid noqoshaha qolada WREMO.

Tababarka Soo dhaweynta Ganacsiga ee lacag la'aanta ah.

Hadii aad maamusho ganacsi ama urur bulsheed, waxaad u baahan doontaa inaad sii wadato hawlgalka ka dib waxyeelo, weyn ama yar. Macaamiishaada iyo shaqaalahaaga ayaa ku tiirsan. Tababarkeena ayaa kaa caawin doona adiga iyo shaqaalahaaga inay diyaar u yihiin in ay sii wadaan hawlgalada ayna go'aanno wanaagsan u yeeshaan ganacsigaaga waqtiyada walaaca.

Ka qaybgalayaashu waxay ka tagayaan inay ogaadaan aasaaska qorsheynta sii wadista ganacsiga oo ay bilaabaan qorshahooda gaarka ah. Waxaanu bixinnaa seminaaro laba saacadood ah oo ku yaal gobolka Wellington.

getprepared.nz/ Businesses waa websaayidka laga barto ganacsiga.

Qorshayaasha Waxqabadka Bulshada.

Dadka adiga oo kale waxay ka qayb qaadanayaan Qorshaha Waxqabadka Bulshada. Soo ogoow qorshe-hawleedka iyo sida aad wax ugu biiri karto. Waxaad leedahay aqoon qiimo leh oo ku saabsan bulshadaada oo kaa caawin doona inaad isbeddel ku sameyso.

getprepared.nz/ ResponsePlan waa websaayidka qorshaha jawaab celinta.

Nala soo xiriir.

wremo@gw.govt.nz

04 830 4279

facebook.com/WREMOnz

Raadso Xarunta Adeega Deg dega Badbaadinta Bulshada ee Golaha Degaankaaga

Xaaladaha Adeega Deg dega ee Bulshada ayaa aruurinaya dhibcooyinka bulshadaada. Hubs xarumaha loo isticmaalo in lagu magacaabo.

Xarumaha Badbaadinta Rayidka - laakiin waxaan u bedelnay magaca si ay u muujiyaan ujeedadooda.

Ka dib markii uu dhulgariirka weyn dhaco, dadka deegaanka waa sida adiga oo kale waa inaad isku soo aruurisaan goobta Hubs waa xarunta adeega deg dega badbaadinta bulshada ee golaha deegaankaaga sidii aad isugu xariiri laheydeen jawaabaha bulshada u baahan in la siiyo adigoo adeegsanaya xirfadaha iyo qeyraadka kugu haboon.

Soo ogoow meesha kuugu dhow ee xarunta adeega deg dega badbaadinta bulshada ku yaal, booqo websaayidkooda. **www.getprepared.nz/Hubs**

Xaruntaan waxay tahay xarun leh meel biloow oo mashiinka aasaasiga u ah ee ka kooban qalabka xafiisyada sida Raadiyaha AM / FM, Qariidada Map, iyo raadiyaha Isku-xirka Rayidka ah oo u ogolaanaya isgaarsiinta Xarunta Hawlgalka Gurmadka ee Golahaaga.

Ma jiraan wax dheeraad ah ee loo isticmaalo adeega deg dega ah, ee ku siinaaya qolada adeega deg dega badbaadinta bulshada Hubs.

Dhulgariirka ka dib

Sharooto ku xir miiska jikada ku jira.

Sunami waa Qatar aad u badan

- Si dhaqso ah ugu soco badbaadada cagta ama baaskiilka - gudaha ama kor u kac. Ha wadin baabuur.
- Raac fariimaha dariiqa Sunami ee Tsunami iyo calaamadaha lagu daad-gureynayo meelaha ugu dhow ee amaanka ah ama ka sareeya Liisaska Sunami. Sii soco oo jidka u banee dadka kale ee gadaashaada jooga oo raba inay naftooda badbaadiyaan.

La xiriir dadka kale

- Waa inaad tagtaa meesha laguu qorsheeyay oo amaan ah in laysugu yimaado, ka hor inta aadan isku dayin inaad guriga ku soo noqoto.
- U sheeg dadka inaad nabad qabto oo meel amaan ah aad joogto ka dib la socodsii xaaladaada warbaahinta bulshada iyo hadii aad awoodo u duub fariin cod ah.

Soo aruuri caruurtaada

- Hubso in qof kasta ogyahay qorshaha uu yahay. Ha galinin naftaada Qatar adoo aadaya dugsiga marka caruurtaada ay meel maan ah joogaan! soo wad caruurta marka ay amaan tahay.

Ka dhig gurigaada meel amaan ah

- Demi gaaska si aad uga hortagto inuu qarxo waa hadii aad maqasho ama uriso wax gubanaayo.
- Demi korontadu hadii ay baxdo ama hadii aad si dhaqsi ah uga baxdo gurigaada, waxaa dhici kara in fiilooyinka ay dhaawac soo gaaraan oo aanan adigu arki karin..
- Xir biyaha, gaar ahaan hadii aad u maleyneyso in tubada biyaha uu meel ka daadinayo ama uu jabsan yahay waxaa dhici kara in waxyeelo u gesto gurigaada.

Biyaha iyo fayadhowrka.

- Karkari biyaha aan la daaweyn mudo hal daqiiqo ah ka hor inta aadan isticmaalin, ama ku dar ½ qaado bleach ka aan carafta laheyn, waa maxay (bleach) waa kan lagu daro dharka cad cad marka la dhaqayo ama kan musqulaha lagu dhaqo.
- Ha soo jiidin biyaha musqusha, markaad mushqul u baahato qod god yar si aad ugu rido wasaqdaada, ka dib isnadiifi hadii aad awoodo.

Hubi deriskaaga

- Fiiri ama ogoow qofkasta oo keligii guriga degan yahay oo dhaqdhaqaaqa ku yar ama laga yaabo inuu u baahdo caawinaad dheeraad ah.
- Midba midka kale waa inuu taageeraa adigoo la wadaagaya xirfadahaaga iyo qayraadkaaga..

Aad Xarunta Adeega Deg dega Badbaadinta Bulshada ee Golaha degaankaaga.

- Hadii aad u baahan tahay gargaar
- Hadii aad ku caawin karto adoo wadaagaya qayraadka iyo xirfadaha.
- Inay soo uruuriyaan oo wadaagaan macluumaadka ku saabsan waxa ka dhacay xaafadaada.
- Si aad isugu dubarido jawaabtaada jaaliyadeed ee degaankaaga iyo inaad u gudbiso xogta Golaha Hawlgallada Gurmadka ee Golaha

Booqo websaayidka www.wremo.nz ama dhageyso raadiyaha si aad u hesho macluumaad deg deg ah

Waan diyaar garownay!

Goobta ay qoyska ku kulmaan.

____

Meesha looga xariiri karo ama laga heli karo qofka wadaaya caruurteena

____

____

____

Xarunteena gurmadka deg dega ah:

____

Meesha deriskeena looga xariiri karo ama heli kara waa.

____

____

____

____

Waxyaabaha aan isticmaalno meel ayaa loo qorsheeyay:

Biyaha:

Korontada:

Gaas:

Booqo www.getprepared.org.nz macluumaadka u-diyaarsanaanta xaaladda deg dega ah.